

Waa maxay The Orange door?

The Orange Door waa hab cusub oo loogu heli karo adeegyada haweenka, caruurta iyo dhalinyarada kuwaas oo la kulma rabshadaha qoysaska, iyo qoysaska u baahan ka taageeridda xagga daryeelka caruurta ama dhalinyarada. Uma baahnid u-gudbinta si aad ugu hesho caawimaad iyo taageero adoo u maraya The Orange Door.

Muxuu The Orange Door ii-sameyn karaa?

La-xiriir The Orange Door haddii:

- qof kuu dhaw uu ku dhibayo, ku koontoroolayo ama ku cabsi gelinayo, sida lamaanahaaga, xubin qoyska ah, kula-daganaha-guriga ama daryeelahaaga ah
- aad la dhibaatooneysid waalidnimada sababtoo ah khilaafka qoyska, arrimaha lacagta, jirro, qabatin, murugo ama go'doominsanaan
- aad ka walwalsan tahay ammaanka iyo daryeelka ilmaha ama qof dhalinyarada ah
- aad ka walaacsan tahay ammaanka saaxiib ama xubin qoyska ah.

Haddii aad tahay soo-galooti ama qaxooti ama aadan haysan deganaansho rasmi ah, weli waan ku caawin karnaa. Haka baqin inaad codsato taageero sabab xaaladdaada socdaalka la xiriirta darteed.

Tani waa adeeg lacag la'aan ah.

U ogolow shaqaalaha The Orange Door inay ogaadaan haddii aad doonayso inaad taleefan kula hadasho ama qof ahaan u tegidda xarunta si aad ugala hadasho xaaladdaada.

Waxaan u baahanahay turjumaan

U-sheeg adeegga haddii aad u baahan tahay turjumaan.

Adeeggu ha ogaado:

- lambarka taleefankaaga
- luqadaada
- marka ay haboon tahay inaad wacdo.

Turjumaan ayaa markaas dib kuu soo wici doona.

Miyey The Orange Door tahay adeegga la iigu talagalay?

The Orange Door waxay soo dhaweynayaan dadka da' kasta ah, jinsi kasta ah, galmada iyo kartida kasta leh. Dhammaan doonista dhaqanka iyo diinta waa la ixtiraamayaa. U-sheeg shaqaalaha haddii aad door bidayso inaad la shaqeyso shaqaale lab ama dhedig ah.

The Orange Door waxay la shaqeysaa adeegyada dhaqamada kala duwan, adeegyada lesbiyaanka, khaniisyada, isgashatada, laga-roonaha, iyo isku-jirka (LGBTI) iyo adeegyada iinta si loo daboolo baahiyaha kala duwan ee shakhsiyaadka iyo qoysaska.

Shaqaaluhu waxay ku siin doonaan macluumaad ku saabsan khayaarada iyo waxayna kugu xirayaan adeegyada aad u baahan tahay.

Xaggee The Orange Door ku taal?

Ka eeg www.orangedoor.vic.gov.au si aad u aragto khariidada adeegyada deegaankaaga ah

Goorma ayey The Orange Door furan tahay?

The Orange Door waxay furan tahay 9am ilaa 5pm Isniinta ilaa Jumcaha (xiran maalmaha fasaxyada).

Halkee ayaan tagayaa markii The Orange door aysan furnayn?

La xiriir adeegyadan soo socda wixii saacadahaas ka baxsan:

- Adeega Gudbinta Ragga taleefanka 1300 766 491 (8am-9pm Isniinta-Jumcaha iyo 9am-5pm Sabtida iyo Axadda) (La-talinta taleefanka ee rabshadaha qoyska ee ragga, adeegga macluumaadka iyo gudbinta)
- Adeegga taageerada rabshadda qoyska ee safe steps taleefanka 1800 015 188 (24 saacadood, 7 maalmood asbuucii) waxaa loogu talagalay dumarka iyo carruurta kuwaas oo ah dhibanayaasha rabshadaha qoyska
- Khadka taleefanka ee Victims of Crime (dhammaan dhibbanayaasha dembiga jariimada ah iyo dhibanayaasha ragga waaweyn ee rabshada qoyska) taleefanka 1800 819 817 (8am – 11pm, maalin kasta)
- Khadka Qalalaasaha Ku-xadgudubka Galmada waxaa loogu talagalay dhibbanayaasha ku-xadgudubka galmada taleefanka 1800 806 292 (5pm – 9am Isniinta ilaa Jimcaha, 24 saacadood iyo maalmaha weekends-ka iyo fasaxyada dadweynaha)

Haddii adiga ama qof kale uu ku jiro khatar degdeg ah, ka wac Saddex Eber (000) wixii gargaar degdeg ah.